COA Centraal Orgaan opvang asielzoekers

# Karnafaalka[1] Nederland

Maalinta sabtida 6, axada 7, isniinta 8 iyo talaadada 9 febraayo 2016 waxaa lagu qabanayaa, gaar ahaan gameetiyo badan oo koonfurta Nederland ee gobolada Limburg iyo Waqooyiga-Brabant dabaaldeg sanadle ah ee karnafaalka.

**Xafladaha shacbiga ah ee degmooyinka**

Xafladahan ee sanad walba la caadeyestey, oo sidoo kale ka dhaca wadamo kale iyo qeybo aduunka ka mid ah sida Jarmalka, Zwizerland, koonfurta Amerika, si weyn looga dabaaldego, ayaa gudaha Nederland siiba dadweynaha degmooyinkaasi ay u dabaaldegaan. Degmooyinka qaarkood ayaa karnafaalka seddax ama afar maalmood looga dabaaldegaa. Waa xaflad oo muusiko, heeso, ciyaaro, dhar midabo badan iyo maskarooyin la xirto iyo cunto iyo cabitaanba. Dhamaan dadka dabaaldegaya waxay xiran yihiin nuuc walba oo labis midabo badan. Xataa wadooyinka inta badan waa la qurxiyey,baararka iyo maqaayadaha xaflada darteed waxaa lagu qurxiyey waxyaabo ay ka mid yihiin nalal midabo leh iyo xargo.

**Isku daba ridka**

Degmo kasto waxaa ay leedahay hal ama in badan oo ururo ah oo xaflada si fiican isugu daba ridaya. Ururadaasi maxaliga ah samaynayaan in qof degaanka ah ama mararka qaarkood qof aan degaankaa ahayn in ay magacaabaan in uu yahay amiirka karnafaalka. Qofkaasi waxuu leeyahay gacan yare yaal xiran dhar isha soo jiita, qofkaasi waxaa laga rabaa in uu xaflada furo. Sida badan waxaa bilowga xaflada la siiyaa furaha magaalada oo uu siinayo duqa magaaladaasi. Sidaa waxaa loola jeedaa in lagu muujinayaa inta ay xafladahaasi socdaan awooda gacanta dadka dadka dabaaldegaya. Tani ma aha wax aan run ah oo awooda waxaa weli ay ku jirtaa gacanta duqa magaalada sidoo kale mas'uuliyada. Dadka degaanka si keli keli ah ama koox koox ah ayay uga qeybgelayaan. Mararka qaarkood waxaa ay isku kooxeysteen ururo karnafaalka sameeya oo waxaa ay samaynayaan tusaale dad badan oo saaran gaadiid la soo qurxiyey.

**Xafladaynta**

Ka sokow magacaabida amiirka waxay ururadu isku daba ridaan nuucyada kala duwan ee xafladaha sida in koox koox lagu soo maro oo wata gaadiid la qurxiyey iyo muusik, ama heeso, cuntooyin kala duwan oo xaflada loogu tala galay, daah ka qaadid taalooyin ku meel gaar ah iyo wax la mid ah. Dabaaldegyada noocaas ah waxaa isku daba ridi kara dad kale. Waxaase ka talinaya dadka degaanka laguna salaynayaa dhaqan soo jireen ah.

**Ku jees jeesid**

Kaftamid iyo majaajilo dadka lagaga qoslinayo waa qeybo muhiim u ah dabaaldegyada. Majaajilo dadka laga qosliyo qaab ah ayay isku deyeyaan in kuwa lagu majaajilaysanoyo si hadal iyo ficilba ah loo tuso waxyaabaha ka qaldan. tani waxay ku dhacdaa sida uu qof kasta filan karo dowlada, oo mararka qaarkood sida dadka degaanka ay qabaan tusaale go'aan qaldan ay gaareen, oo ah mid lagu qosli karo. Si kastaba ha ahaatee waa majaajilo wax hagaajin loogu tala galay oo aan ahayn wax xumayn. Nambarka 11 waa nambarka sida caadada soo jireenka ay qabto nambarka waalida sidaa darteed si badan loo isticmaalo.

---

[1] Karnafaal,waa xaflado shacbi ah

**Ka qeybgalka karnafaalka**
Karnafaal waa xaflad shacbi ah, taa waxaa loola jeedaa qof kasta waa uu ka qeybgeli karaa. Xataa haddii magalaadaasi aadan degeneyn, waad ka qeyb geli kartaa xafladahasi jawiga fiican leh. Waxa ugu muhiimsan xafaladahan waa jawigaasi fiican oo uu qof kasta qeybtiisa ka qaadanayo, Siiba dharka midabdada badan iyo bilicda wanaagsan.
Inta lagu jiro karnafaalka khamri ayaa la bixiyaa. Xataa marka uu qofka cabo, waxaa muhiim ah in qof kasta ka qeybqaato wanaaga jawiga xaflada. Haddii aad su'aalo halkaan ka qabto, waydii shaqaalaha COA macluumaad dheeri ah. Sidoo kale xerooyinka qaxootiga mararka qaarkood waxbaa laga abaabulaa.

## Taariikh kooban

**Qaabka qaboobaha (winter)**
Qeybaha xaflada karnafaalka, ama sida meelo badan looga yaqaan 'Vastenavond'[2] sida ay dadka wax badan ka og qabaan waxay kasoo asaasantay caadooyinkii xiliga qaboobaha. Oo waxay ku taariikhsadaan waqti fog oo ay awoowayaashii hore ee goboladan u heesteen in qabowgu, mira dhal aanu ahayn ee maalinka uu gaaban yahay, cudurku iyo dhimashadana cabsi weyn oo jira ay tahay, ciqaab caro ilaah iyo sheydaamada xun ka timid. Dadku waqtigaasi waxay u haysteen in ay samayn ku yeelan karayn ilaayahdaasi iyo sheydaamadasi oo waxay ku fikireen waxyaabo ay iskaga eryaan ama lagu raali geliyo. Waxaasi oo dhan waxaa loola jeedey in qabowgu uu dhaqsi u dhamaado iyo waqtiga kuleelaha ee mira dhalka ah u soo noqdaa. Waxyaabahaasi caadoyinka ah waxaa ka mid ah xoolo hibayn oo dadku ay keeni jireen ama qaylo iyo maaskaro la xirto.

**Kaniisada Katoolikada**
kaniisada katoolikada waxay muddo dheer iskudaydey in sida ay ayugu qabayn caadooyinkan aadka u xun la mamnuuco oo sidaa ay ku baaba'aan. Markii ay taasi ku guulaysan waayeen waxay yeeleen in caadooyinkaasi jirey lagu hagaajiyo feestooyinka katoolikada. Qarnigii 11 waxay kaniisada soo go'aamisey in inta ka horeysa ciida katoolikada ee "Pasen" (ciise marka uu dib usoo toosay), iyo waqtiga soonka 40 maalmood lagu xiriiriyo. Caadooyinka qaarkood oo markaa jirey si qaboobaha loo yareeyo ay markaa ku soo tooseen maalinta afaraad/seddexaad ee ka horeysa soonka oo mar walba bilaaban jirtay maalin arbaco ah. Taasi waxaa lagu milmay caadooyinka cusub, ugu dambeyntii feestada vastenavod, hadda loo yaqaan karnafaal.

**Suulida "vastenavond"**
'vastenavondfeest' (habeenka soonka ka horeaya) waxuu sidaa ku noqonayaa afar ama seddax maalomood oo ciid ah oo lagu abaalmarinayo afartanka maalmood ee soonka, oo markaa lagu ciido cunto iyo cabitaan badan, muusik garaacid iyo dhar xirasho. Sababtaa dardeed ayaa marar badan loo yiri in ay tahay ciida katoolikada. Hase ahaatee si joogta ah ayay arimahaasi u qaldameen, sababtoo ah dadku khamri badan cabi jireen iyo mararka qaarkood buuq dhici jiray. Sidaa daraadeed ayay kaniisada katoolikada iskudayday in ay xafladahaasi waalan mamnuucdo. Qarnigii 16 waxaa kaniisada ka jiray kala jab waxaa markaa samaysmay kaniisada cusub (Hervormde). Diintan waxay ahayd mid si xoogan uga soo horjeeday karnifaalka, waxayna ogaayeen in gobolada dadka protestantiga ku badan yihiin, gebi ahaanba laga baabi'yo. Goboladaasi waxay ahaayeen kuwa ka koreeya webiyada Nederland, oo degaankaasi dabaaaldegyada waqtigaa laga soo bilaabo ahaayeen kuwo si dhif ah uga dhaca..

[2] Vastenavond waa habeenka dhamaadka karnafaalku

**Dib u soo noolaynta karnafaalka**

Qarnigii 19aad iyo siiba kan 20aad, ka dib dagaalkii labaad ee aduunka, ayaa dabaaldegyada karnafaalka ee koofurta Nederland waxaa dib u soo nooleeyey magaalooyinkii hore ee karnafaalka iyo TV, aadna loo jeclaa, xitaa magaaloyin aan horey si yar ama aanba looga dabaaldegi jiri . Si taasi loo sii wado ayay khasab noqotay in la sameeyo ururo nidaamiya dabaadegyada ee sida loo caambaareeyey oo ka hortaga ka bad badantii horay u dhici jirey oo kale. Hadda magaalo kasta oo koonfurta Nederland waa looga dabaaldegaa karnafaalka, siiba gobolada Limburg iyo Waqooyiga-Brabant. Sidaa daraadeed ayay ururada karnafaalka nidaamiya badanaa bilooyin uga howgalaan.